



## **Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WAR-SAXAAFADEED 031/2009**

#### **Ergeyga Gaarka ah ee Qarammada Midoobay oo ku baaqay in si wadajir ah loo wajaho taageerida Soomaaliya**

Nayroobi, 16 November 2009 – Ergeyga Gaarka ah ee Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimmah Soomaaliya, Ahmedou Ould-Abdallah, SRSG, ayaa kulan la yeeshay Louise Arbour, oo ah madaxweynaha iyo CEO-da Kooxda Caalamiga ee meelaha qalalaasaha (ICG) uu ka jiro. Kulanka wuxuu ku soo beegmay mar la soo gabagabeeynaayay shir ay ku lahaayeen magaalada Dar es Salam, caasimada Tanzania, Gudigga Xiriirka Caalamiga.

Ergayga Gaarka ah wuxuu kaloo wada hadal la yeeshay, Bernard Membe, wasiirka arrimmah dibadda ee Tanzania.

Ergayga Gaarka ah wuxuu ugu hambalyey Ms. Arbour jagada cusub ee loo magacaabay oo ah inay madax ka noqoto ICG-Da, ka dibna wuxuu warbixin ka siiyey arrimmah Soomaaliya. Wuxuu u faahfaahiyey sida ugu haboon ee lagu xoojin karo xasiloonaada Soomaaliya inay tahay sii wididda taageerada la siinayo Xukuumadda si ay u noqoto mid tayo ku leh waddanka gudihiisa, isla markaasna ay saaxiib muhiimah u noqoto bulshada caalamka.

“Waxaa la gaaray waqtigii laga gudbi lahaa dhibaataada dheer ee haysata ummadda Soomaaliyeed laguna beddeli lahaa in si buuxda oo waxtar leh dalka gudihiisa shaqo looga qabto. Haddaba arrintan waxay u baahantahay in loo helo dhaqaale dheeraad ah”, ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah.

Wuxuu kaloo tilmaamay inuu ku qanacsanyahay in Tanzania ay daneynayso xasilloonaada Soomaaliya.

Isagoo ka hadlaya arriimaha Soomaaliya, Ergeyga Gaarka ah wuxuu soo dhoweeyay taladii ay dhowaan Golaha Wasiirrada ee Ururka Midowga Urub ay soo jeediyeen oo ahayd in Soomaaliya loo tababaro ciidamo isugu jira boolis iyo militeri oo gaaraya 2000 oo askari. Ergeyga Gaarka ah wuxuu kaloo uu sheegay inuu ku qanacsanyahay in qorshahan deeqsinimada leh uu ka koobanyahay tababaridda, qalabaynta iyo mushaar siinta ciidamada ugu yaraan muddo hal sanno ah.

Talo soo jeedinta Ururka Midowga Urub wuxuu ku soo beegmay waqti uu Madaxweyne Sheekh Shariif Sheekh Axmed uu ka qaybgalayay kulan u dhexeeyay waddanka Sacuudi Carabiya iyo waddamada Geeska Afrika, kulankaasoo lagu qabtay magaalada Addis Ababa, laguna baadigoobayay iskaashi dhaqaale oo dhexmara waddamada gobolka.

“Bulshada caalamku waa inay dedejisaa meelna isugu keentaa dedaalkeeda si loo taageero Dowladda Soomaaliyeed, dadka Soomaaliyeedna ay u helaan asaas adag ay wax dul dhistaan, taasna waa in la helaa inta ka horeysa bisha Agoosto 2011 oo ah waqtiga uu dhammaanayo xilliga Xukuumaddan. Waa haddii aan rabno inaan aragno Soomaaliya oo isbeddel sameysay”, ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah.

Isagoo ka hadlaya Golaha Amaanka, Ergeyga Gaarka ah wuxuu sheegay inuu rajo ka qabo in kulanka la qaban doono 19ka bisha Nofembar ay ka soo bixi doonaan tallaabooyin wax ku ool ah oo laga qaado burcad badeedda. Midowga Afrika iyo urur goboleedka IGAD waxay soo saareen warbinno iyo talooyin dhowr ah ee ku aaddan amaanka iyo falalka burcad badeedka ee ka dhaca xeebta Soomaaliya.